



Executive Office

Date: 19 / 02 / 2013
Ref. No.: X.G.G.F/002/2013

مكتب رئيس المجلس التنفيذي

التاريخ: 08 / ربيع ثانی / 1434 هـ
الرقم: م. ر. م. ت / 002 / 2013 م



Warsaxaafadeed

ku saabsan Dilkii Sheekh Cabdulqaadir Nuur Faarax.

Kadib markii uu soo gabagaboobay Shir uga socday Magaalada Garoowe intii u dhaxaysay 17-19/ 2013 Jamaacada waxay soo saareen War Saxaafadeed kaan:

1- Waxaan u mahad celinaynaa allaah Subaahanahu Watacaa oo fududeeyey hawlo baddan oo ka mid ah aaskii Sheikha iyo qabqabashadii Danbiilayaasha. Waxaan kaloo u mahad celinaynaa Dowladda Puntland, sida wayn ay howshaan isugu xilqaantay waxna uga qabatay. Sidoo kale waxaan u mahadd celinaynaa dowladda Faderaalka Soomaaliya iyo Dowladda Somaliland kaalinta ay ka qaateen wax ka qabashada dhacddadaan iyo cidkasta oo gacan ka gaysatay.

2- Waxaan u cadaynaynaa Muslimiinta, gaar ahaan Shacabka Soomaaliyeed in kooxda Al-Shabaab ee dishay Sh. Cabdulqaadir ay tahay koox burcad ah, diinta Islaamkana aan wax shaqo ah ku lahayn, ayna tahay musiibo iyo cadow aan ummadda u reebayn, Diin, Naf, Maal, caqli iyo sharaf middna. Waxaana arintaas cadaynaya shirqoolka hal doorka ummadda, sida; Culimmada, Aqoonyahanka, Salaadiinta, Siyaasiyiinta, Saraakiisha, Ardayda, iyo Ganacsatada. Sidoo kale Qarxinta, Xasuuqa, qaxinta, cabsigalinta, niyad jabinta iyo dullaynta ummadda Soomaaliyeed.

3- Waxaan u cadaynaynaa ummadda Soomaaliyeed in aan illaahay iyo Rasuulku farin in dadka Muslimiinta ah lagaalaysiiyo ama la laayo, shareecada Islaamkuna aysan qabin, kooxda Al-shabaabna ay illaahay iyo Nabiga ku been abuuranayaan.

4- Hadaba waxaa waajib ku ah ummadda Soomaaliyeed qaybaheeda kala duwan sida; Maamulada, Qabiilooyinka, iyo bulshada oo dhan inay si wada jir ah uga hortagaan kooxda Al- Shabaab ee dabargoyneysa Ummadda , maadaama ay yihiin khatar ku wajahan ummadda idilkeed.

5- Waxaan Shacabka u cadaynaynaa in kooxaha shirqoolada iyo qaraxyada fulinya aysan matalin qabiilooyinka ay ka dhasheen , lagalana tashan, dadka ay bartilmaameed sanayaana aysan u dilayn qabiil ahaan, aysana jirin qabiil loogu danaynayo falalakan guracan ee ay ku kacayaan. Sidaa daraadeed;

المقر الرئيسي: Garowe – Somalia
التلفون: +252-584-3311
نقطة: +252-907-99987

- b) Sharci ahaan looma aanayn karo beelaha ay ka soo jeedaan,
- t) mana banaana in dadka falalkaas fulinaya, lagu kaalmeeyo falkooda qaldan, lamagan galiyo, ama gabaad loo noqdo.
- j) marka laqabto danbiilayaashana looma gurmankaro. Looma doodi karo, lamana difaaci karo.
- x) waxaan u cadaynaynaa cidii sidaa yeesha lacnada illaahay inay mutaysanayaan.

6- Waxaan usoo jeedinaynaa beelaha Soomaaliyeed inay ka digtonaadaan utunta, iska horkeena iyo colaada ay ka dhex abuurayso koox Al-Shabaab. Waxaan kaloo soo jeedinaynaa inaan dheg loo dhigin dicaayadaha marin habaabinta ah ee kooxdaasi u adeegsadata weecinta iyo daboolista faldanbiyoodkooda.

7- Waxaan cadaynaynaa in kooxdii faldanbiyeed isu kaashata ama wada fulisa sharci ahaan isku xukun yihiin. Sida; kan amray, kan dilay, kan lacagta baxshay, kan soo ilaaleeyey, kan gaariga ama guriga u kireeyey, kan qariyey, iyo kan raacdo reebka ah.

8- Waxaan usoo jeedinaynaa dhamaan Maamulada Dalka inay ku dhaqmaan shareecada Islaamka, cidkasta oo faldanbiyeed gaysatana lagu qaado xukunka Shareecada islaamku ka qabto arinkaas.

9- Waxaan marlabaad usoo jeedinaynaa ummadda Soomaaliyeed maamul iyo shacaba in la isugu yimaado shir wayne heer qaran ah oo looga arinsanayo dhibaataada kooxda Al-Shabaab ay ummadda ku hayso.

10- Ugu danbayntii waxaan u dardaarmaynaa ummadda Soomaaliyeed illaahay cabsidiisa iyo inay ku dhaganaadaan Diintooda, caqiidada saxanna ka qaataan culimmadda, si ay uga badbaadaan marin habaabinta kooxda Al- Shabaab wado.

Golaha Fulinta ee Jamaacada Al- Ictizaam Bilkitaab Wassunah



Sheekh Axmed C/samad C/llaahi
Gudoomiyaha Golaha Fulinta

المقر الرئيسي: Garowe – Somalia
التلفون: +252-584-3311
نقطة: +252-907-99987